

REPUBLIC OF SOMALILAND
THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-2619/072014

DATE 05/07/14

XEER MADAXWEYNE Lr: 0403/072014
Aasaasidda Ciidanka Dab-Demiska Qaranka

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu arkay: Qodobka 76aad ee Xeerka is-maamulka Gobollada iyo Degmooyinka Xeer Lr.23/2007;

Markuu arkay: Khatarta baaxadda leh uu dalka iyo dadka ku hayo dabku;

Markuu arkay: In ay daruuri tahay in la helo cid masuuliyadi si gaar ah uga saran tahay la dagaalanka dabka;

Markuu garawaaqsaday: In loo baahan-yahay cid si gaar ah ugu xilsaaran la dagaalanka dabka, ka tala-bixinta iyo isku duwidda hawlaha a tacaalidda dabka;

Markuu hubsaday: In Qaranku u baahan-yahay cid si gaar ah ugu xilsaaran la dagaalanka dabka, ka tala-bixinta iyo isku duwidda hawlaha la xidhiidha la dagaalanka iyo ka hortagga dabka;

Markuu six eel dheer: Ula tashaday dadwaynaha iyo laamaha dawladeed ee ay khuseyso;

Wuxuu soo saaray;

Qodobka 1aad
Aasaas Dab-damiska

Waxa halkan lagu Aasaasay Ciidanka Dab-Demiska Qaranka oo leh Qofnimo Qaanuuneed, xaruntiisuna tahay Caasimadda Jamhuuriyadda Somaliland, laaman ka furan Kara Gobollada dalka, kaas oo hoos imanaya Ciidanka Booliiska oo ku le awoodaha kala ah:

1. Helidda warbixinada shaqada, maaliyadda, qiimaynta la socodka siyaasadda, halbeegyada iyo tilmaamaha guud ee Xukuumadda, baabi'inta ku xad-gudubka maamulka iyo awoodda iyo u gudbinta Xukuumadda Dhexe odoraska Miisaaniyadda.
2. Awoodda kala hormarinta qorshayaasha oo mudnaanta lagu kala siinayo qorshayaasha.

Qodobka 2aad

Ujeedada Dab-damiska

Ujeedada Dab-demisku waa inuu ka badbaadiyo bulshada kahtarta dabka.

Qodobka 3aad Xilka iyo Waajibaadka

Xilka iyo waajibaadka Ciidanku waa:

1. Dejinta qorshayaal iyo cilmi-baadhisaha lagama-maarmaanka u ah horumarinta ujeedooyinka iyo hababka ka hortagga iyo xakamaynta dabka, iyada oo loo eegayohorumarinta xaga wershedaha iyo dhismaha.
2. Si degdeg ah uga jawaabidda marka ay dhacaan Shilalka dabku si loo yareeyo khasaarahooda xaga Nafta iyo Maalkaba iyada oo lala xidhiidhayo hay'adaha kale ee ay khusayso.
3. Fulinta iyo dabagalka qorshayaasha iyo hababka gaarka u ah hawlaha dab-demiska iyo badbaadinta dadka iyo hantida.
4. Fulinta iyo dabagalka qorshayaasha iyo hababka gaarka u ah hawlaha dab-demiska iyo badbaadinta.
5. Fidinta wacyi-gelina ka hortaga khataraha dabka iyo shilalka iyada oo loo marayo warbaahinta si loo xaqiijiyo ujeedooyinka ka hortagga dabka.
6. Dejinta, rakibaadda iyo dayactirka hab-tilmaama (fire alarm) marka dab kaco iyo qalab lagu damiyo dabka.
7. Diyaargaraynta iyo fulinta talaabo kasta oo kale oo looga golleeyahay xaqiijinta ka hortagga dabka iyo suulinta dhibaatiisa.

Qodobka 4aad Awoodaha Dab-damiska

1. In ay galaan goobaha dabku ka kaco iyaga oo dhawraya xurmada hoyga.
2. In ay la wareegaan hantida guurtada ah e lagama maarmaanka u noqota xakamaynta dabka.
3. Ka saarida dadka ku xeeran goobta/goobaha dabku ka kaco.
4. Hagidda hawlaha gurmada iyo badbaadinta ee lagula tacaalayo dabka.

Qodobka 5aad Qaab-dhismeedka Ciidanka Dab-damiska

Qaab-dhismeedka Ciidanka Dab-damiska waxa loo raacaya habka Ciidanka Booliiska Jamhuuriyadda Somaliland.

Qodobka 6aad Xilka iyo Waajibaadka Taliyaha Ciidanka Dab-damiska

Xilka iyo waajibaadka ciidanka dab-damisku waa:

1. Hogaaminta, Ciidanka iyo hawlaha gurmada Dab-damiska.
2. Dejinta iyo horumarinta halbeegyada lagama-maarmaanka u ah ka kortagga iyo la dagaalanka Dab-damiska.
3. Dejinta qorshayaal lagu kobcinayo, isla markaana kor loogu qaadayo aqoonta iyo xirfadaha lagula dagaalamo dabka.
4. U gudbinta hay'adaha ay khusayso warbixinta iyo talooyin la xidhiidha khatarta dabka e dadka soo foodsaari karta.
5. Diyaargaraynta miisaniyada Ciidanka dab-damiska iyo u gudbinta Hay'adaha ay khusayso.

Qodobka 7aad

Xilka iyo Waajibaadka Taliyaha Ku-xigeenka Ciidanka Dab-damiska

Xilka iyo waajibaadka Taliye Ku-xigeenka waa:

1. Ka gacsiinta taliyaha Ciidanka Dab-damsika gudashada Xilkiisa.
2. Hogaaminta waaxda ama waaxaha uu u xilsaaro hogaamintooda.
3. Qabashada xilkiisa marka uu maqan yahay ama uu sabab kale u gudankari waayo xilkiisa.

Qodobka 8aad

Hogaamada Ciidanka

Qaybaha ay ka koobnaanayaan Hogaamada Ciidanka, xilka iyo waajibaadkooda waxaa qeexata Taliyaha Ciidanka Booliiska.

Qodobka 9aad

Magacaabista Taliyaha iyo Taliye Ku-xigeenka Ciidanka Dab-damiska

Taliyaha iyo Taliye Ku-xigeenka Ciidanka Dab-damiska waxaa soo magacaabaya Taliyaha Ciidanka Booliiska marka uu la tashado Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland